


**JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAH**




**XEER-NIDAAMIYAHU SHARCIGA SHIRKADAHA  
SHARCI LAMBAR-18 EE 26.12.2019**

## TUSMO

TUSMO .....	i
LIISKA LIFAAQYADA .....	ii
Qod.1aad: Aasaasidda Xafiiska Diiwaanhayaha Shirkadaha .....	1
Qod.2aad: Madaxa Diiwaanhayaha .....	1
Qodobka 3aad: Ku-Xigeenka Madaxa Diiwaanhayaha Shirkadaha .....	2
Qodobka 4aad: Shaqooyinka Diiwaanhayaha Shirkadaha .....	2
Qodobka 5aad: Awoodaha Diiwaanhayaha Shirkadaha .....	2
Qodobka 6aad: Bixinta Shahaadada Aasasidda Shirkadaha .....	3
Qodobka 7aad: Bixinta Laysinka Ganacsi .....	4
Qodobka 8aad: Dukumiintiyada looga baahan yahay diiwaangelinta shirkadaha .....	5
Qodobka 10aad: Shuruudaha Magaca .....	5
Qodobka 11aad: Sii Qabsasho Magac .....	6
Qodobka 12aad: Beddelidda Magaca .....	6
Qodobka 13aad: Caddeyntha Cinwaanka .....	6
Qodobka 14aad: Khidmadaha .....	6
Qodobka 15aad: Warbixin Sannadeedka Shirkadda .....	7
Qodobka 16aad: Noocyada Lacag Bixinta .....	7
Qodobka 17aad: Diiwaanada Elektarooniga ah iyo Kuwa Aan ahayn iyo Faylasha .....	7
Qodobka 18aad: Sixidda Xogta Diiwaangashan .....	8
Qodobka 19aad: Diiwaangelinta Laan Shirkad Shisheeye .....	8
Qodobka 20aad: Xasaanadda .....	9
Qodobka 21aad: Xadgudubyada iyo Ganaaxyada .....	9
Qodobka 22aad: Xeer-Nidaamiyeyaasha .....	9
Qodobka 23aad: Dhaqangalinta .....	9
Shaxda 1aad .....	10
Khidmadda Aasaasidda Shirkadaha .....	10
Shaxda 2aad .....	11
Ganaaxyada .....	11
Shaxda 3aad .....	12
Sumadda Abla-ablaynta Hawlaha Ganacsiga (ICC) .....	12

**LIISKA LIFAAQYADA**

1. Nidaamka Abla-ablaynta
2. Jaantuska 1aad: Khidmadaha Aasaasida Shirkadaha iyo Laysinka Shirkadaha

A handwritten signature in black ink, appearing to read "K. Omar".

**XEER WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAH A Lambar....., Taariikh**

**WASIIRKA GANACSIGA IYO WARSHADAH A**

1. Markuu Arkay Qodobka 102, lambar (1) ee Dastuurka KMG Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
2. Markuu arkay Qoddobada 14aad, 83aad-87aad, 89aad, 92aad iyo 99aad ee Sharciga Shirkaddaha ee lambar 18 soona baxay 26 Disembar 2019
3. Markuu garawsaday baahida loo qabo in la dhiirrigeliyo ganacsiga, wax soosaarka iyo maalgelinta si loo harmariyo dhaqaalaha Soomaaliya iyadoo la fududeynaayo habraaca dhismaha, diiwaangelinta, laysimada iyo adeegyada kale ee ganacsigu u baahan yahay
4. Markuu tixgeliyey fursadaha tiknolojiyada isgaarsiinta ee u sahlaaya ganacsatada in ay helaan adeegyada wasaaraddu bixiso ayaga oo jooga xafiiskooda ama goobaha shaqada, maacaamiishuna ka heli karto akhbaarta ay shirkadaha iyo ganacsigooda uga baahan yihiin si khadka tooska ah (online).

**WUXUU XEERIYAY**

**Qod.1aad: Aasaasidda Xafiiska Diiwaanhayaha Shirkadaha**

1. Waxaa la dhisay Xafiiska Diiwaanhayaha Shirkadaha (oo hadda ka dib la oran doono "Diiwaanhayaha Shirkadaha") kaas oo leh jiritaan sharci, kana tirsan isla markaana hoos yimaadda Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha.
2. Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu leeyahay awood iyo sharciyad uu ku dhaqangaliyo Xeer-nidaamiyahan kuna maamulo howlaha shirkadaha sida ku xusan Xeernidaamiyahan.
3. Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu aasaasi karaa laamo marka loo baahdo si loo daboolo baahida loo qabo in la gaarsiiyo adeegga Diiwaanka Shirkadaha dalka oo dhan.

**Qod.2aad: Madaxa Diiwaanhayaha**

1. Madaxa Diiwaanhayuhu waa sarkaal dawladeed oo uu magacaabay Wasiirkha Ganacsigu iyo Warshadaha iyada oo la raacayo Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah.
2. Madaxa Diiwaanhayuhu waa shakhsiga masuulka ka ah kaydinta iyo ilaalininta xogta shirkadaha ganacsi ee cusub iyo kuwa hadda jira ee si sharci ah u diiwaan gashan. Sidoo kale wuxuu ilaolinaayaa sameyn ta shirkado cusub iyo cusboonaysiinta ama wax-kabeddalka kuwa hadda jira.
3. Madaxa Diiwaanhayuhu wuxuu mas'uul ka noqon doonaa in uu xifdiyo, dhammaan dukumiintiyada loo soo gudbiyo Diiwaanhayaha Shirkadaha, kuwa daabacan iyo kuwa elektarooniga ah labadaba, sida uu sharcigani dhigayo wuxuuna u oggolaanayaa dadweynaha in ay heli karaan xogtaas si waafaqsan Qodobka 32, faqrada 1aad ee Dastuurka.

*K. Omar*

4. Madaxa Diiwaanhayuhu wuxuu baarayaa oo diiwaangelinaya dhammaan warbixinnda iyo dukumiintiyada kale ee loo gudbiyo Diiwaanhayaha.
5. Madaxa Diiwaanhayuhu wuxuu diyaarin doona aragti sharci iyo warbixinno sharci oo kooban isla markaana wuxuu ka caawin doona Wasiirka sidii loo dejin lahaa habraacyada/xeerarka loogu talagalay in lagu gaadho ujeedooyinka Sharciga Shirkadda markii loo baahdo.

#### **Qodobka 3aad: Ku-Xigeenka Madaxa Diiwaanhayaha Shirkadaha**

1. Waxa kale oo jiri doona Ku-xigeenka Madaxa Diiwaanhayaha iyo tiro Kaaliyayaal Diiwaanhaye iyo saraakiil kale ah marba sida loogu baahdo iyada oo la eegayo ujeeddada Xeer-nidaamiyahan.
2. Haddii uu Madaxa Diiwaanhayuhu ansixiyo, Saraakiisha kale ee noocan ahi waxay yeelan doonaan awood ay ku fuliyaan shaqooyinka Xafiiska Diiwaanhayaha Shirkadaha sida ku xusan Xeer-nidaamiyahan.

#### **Qodobka 4aad: Shaqooyinka Diiwaanhayaha Shirkadaha**

Shaqooyinka Diiwaanhayaha Shirkadaha Waxaa ka mid ah:

- 1 Bixinta shahaadooyinka aasasidda shirkadaha oo leh lambar taxane ah oo khaas ah iyo astaamo amni iyo Bixinta rukhsadaha ganacsiga guud iyo hawlaha warshadaha oo iyagna leh lambar taxane ah oo khaas ah iyo astaamo amni.
- 2 Hubinta in dhammaan diiwaanada uu hayo Diiwaanhayuhu ay u yaallin qaab suurto galinaya in dhammaan macluumaadka ku jira diiwaanadaas si fudud loola soo bixi karo si loo baaro nuqullana looga sameeyo.
- 3 In uu mas'uul ka ahaado hubinta in la gudbiyo khidmadaha uu Diiwaanhayaha u ku jideeyay sharcigani ama shuruuc kaleba lagu shubo Xisaabta Khasnada Dawladda;
- 4 In uu noqdo ilaaliyaha shaabadda diiwaanka shirkadaha;
- 5 Diyaarinta iyo u soo gudbinta warbixin Wasiirka loo gudbiyo muddo lix bilood gudaheed ah oo ka bilaabanta dhamaadka sanad-xisaabeed kasta, (sanad taariikheed) oo ku saabsan howlaha xafiiska iyo waxqabadyada Diiwaanka Shirkadaha oo ay weheliso warbixinta maaliyadeed ee hawlgaladaas iyo waxqabadyadaas.
- 6 Qabyo-tirka iyo cusbooneysiinta keyd macluumaad oo elektarooniga ah iyo ka dhigidda macluumaadka shirkad kasta in ay ka heli karaan dadweynuhu iyada oo aan la dhaafayn xuduudaha uu banneeyay Xeerkani.
- 7 Diiwaanka Shirkaduhu waxaa uu qaban doonaa warbixinta sanadlaha ah ee shirkadaha diiwaangashan.
- 8 In uu adeegsado wixii kale ee awood ah ee Sharciga Shirkaduhu ama shuruucda kale ama xeer-nidaamiyeasha uu soo saaro Wasiirku ay siinayaan Diiwaanhayaha.

#### **Qodobka 5aad: Awoodaha Diiwaanhayaha Shirkadaha**

1. Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu awood u leeyahay in uu xaqijiyo u hogaansanaanta shuruudaha sharci ee diiwaangelinta shirkadda isagoo hubinaya magaca shirkadda, cinwaanka xafiiska diiwaangashan, nooca ganacsiga, faahfaahinta agaasimayaasha, faahfaahinta saamileyda, caddeynta cinwaanka iyo Aqoonsiga, qabashada khidmadda diiwaangelinta.

2. Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu awood u leeyahay inuu baaro diiwaanka shirkaddaha ee yaala Diiwaanhayaha Shirkadaha si loo helo macluumaadka aasaasiga ah.
3. Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu awood u leeyahay go'aaminta iyo qabashada khidmadaha iyo ganaaxyada ku xusan Shaxda 1aad iyo Shaxda 2aad ee sharcigan. Diiwaanhayaha Shirkaduhu waa inuu hubiyaa in dhammaan ogeysiis yada khidmadaha ay heli karaan dadweynuhu.
4. Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu leeyahay awoodda baaritaan sida ku qeexan Qeybtan 4aad ee la xiriirta howlaha khiyaanada leh ee qodobadda Faqrooyinka (a) ama (b) ee hoose ay noqdaan kuwo la cuskan karo:
  - (a) Haddii Diiwaanhayaha Shirkaduhu uu helo sababo macquul ah oo tilmaamaya in qodobada Xeerkan ama Sharciga Shirkadaha aan la raacin,
  - (b) ama in dukumiinti la soo gudbiyay sida uu dhigayo Xeerkan uusan shaaca ka qaadin xaqiqida dhabta ah ama uusan bixinayn qiraal buuxa oo cadaalad ah oo ku saabsan arrimaha loola jeedo in ay ku saabsantahay,
  - (c) Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu amar qoraal ah kaga dalban karaa shirkadda ay khuseyso in ay soo saarto buugaagta iyo diiwaannada shirkadda ama in ay ku soo bixiso qoraal ahaan macluumaadkaas ama sharraxaaddaas sida Diiwaanhayaha Shirkaduhu uu amarkiisa ku qeexay. Buugaagta, diiwaanada ama macluumaadka noocaas ah waxaa lagu soo saari doonaa muddada uu amarku cayimay.
  - (d) Marka ay shirkadi hesho amarka noocaas ah waxaa ay noqonaysaa waajib saaran dhammaan maamulayaasha, agaasimayaasha iyo saraakiisha shirkadda in ay soo saaraan buugaagta, diiwaannada ama sharraxaadda noocaas ah inta ay awood u leeyihiin .
  - (e) Diiwaanhayaha Shirkaduhu kaydka kuma dari doono dokumanti la xiriira amar noocaas ah illaa iyo inta amarkaas la fulinayo, sidoo kalena haddii jawaabaha la bixiyay ay tilmaamayaan in dukumiintigu uusan waafaqsaneyn qodobada Xeerkan ama Sharciga Shirkadaha markaana kaydka lagu dari maayo.
  - (f) Wixii su'aalo ah ama khilaafaa ah ee la xiriira baaritaanka noocaas ah waxaa loo gudbinayaa oo go'aan ka gaaraysa Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.
  - (g) Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu waxaa ay awood u leedahay in ay u gudbiso Xafiiska Xeer Ilaalinta si uu go'aan uuga gaaro wixii fal-dambiyeed ah.

#### **Qodobka 6aad: Bixinta Shahaadada Aasasidda Shirkadaha**

1. Haddii Diiwaanhayaha Shirkaduhu uu ku qanco in shuruudaha Sharcigan Shirkadaha ee ku saabsan codsiga abuuridda shirkadaha la dhammaystiray isla markaana la bixiyay khidmadda la jideeyay, Diiwaanhayuhu wuxuu gelinaya faahfaahinta shirkaddaa Diiwaanka Guud.
2. Haddii Diiwaanhayaha Shirkaduhu uusan sidaa ugu qanacsaneyn, wuxuu isla markiiba ogeysiinayaa codsadaha(yaasha), isagoo qoraal ku sheegaya sababaha arrintaa keenay. Khilaafka arrintan ku saabsan waxaa racfaan looga qaadan karaa Wasaaradda ka dibna maxkamadda iyadoo la raacayo nidaamka rafcaanka ah ee habboon.

- 3 Diiwaanhayaha Shirkaduhu, isagoo raacaya barnaamijka diiwaan-gelinta, wuxuu siin doonaa ganaciyada lambar gaar ah oo tilmaamaya caynadda shirkadda iyadoo la siinayo shahaadada abuurista shirkadda taas oo ka koobnaan doonta nooca iyo magaca shirkadda, shaabadda Wasaaradda, taariikhda iyo goobta laga bixiyay, qoraalka rasmiga ah ee caddaynaya in ay shirkaddu ka soo baxday shuruudihii sharciga ahaa sidaa darteedna ay ka diiwaan-gashan tahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uuna saxiixay Madaxa Diiwaanhayuhu ama kuxigeenkiisu.
- 4 Shahaadada abuurista shirkadaha waxaa lagu soo saari doonaa hal (1) maalin shaqo gudaheed ka dib marka dukumentiga codsiga si sax ah looga aqbalo
- 5 Shahaadada abuurista shirkaduhu waxaa ay ansax tahay ilaa iyo muddada ay shirkaddu jirto marka laga reebo isku-biiridda shirkadaha, marka shirkad la iibsado iyo isbedelada waaweyn ee waajibinaya dib u diiwaangelinta shirkadda.
- 6 Shahaadada abuurista shirkadda ee lagu soo saaray Qodobkan ayaa ah caddayn kama danbays ah oo tilmaamaysa in shuruudihii Xeerkan iyo kuwii Sharciga Shirkadaha ee diiwaangelinta iyo abuurista shirkadaha la fuliyay.

#### **Qodobka 7aad: Bixinta Laysinka Ganacsi**

1 Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu sidoo kale siinayaa shirkad gaar loo leeyahay ama shirkad dadweyne lambar Laysin oo khaas ah oo ay ku ganacsadan, kaas oo ah rukhsad guud oo lagu bilaabi karo nooca ganacsi ee ku tilmaaman laysinka, si waafaqsan Sharciga Laysimada Ganacsiga.

L-Omar

### **Qodobka 8aad: Dukumiintiyada looga baahan yahay diiwaangelinta shirkadaha**

Dukumiintiyada looga baahan yahay diiwaangelinta shirkadaha waxaa ka mid ah kuwa soo socda, sida uu dhigaya Qoddobada 6aad iyo 13aad ee Sharciga Shirkadaha ee 2019:

- 1 Codsi lagu gudbiyo foom uu soo saaray ama uu ansixiyay Diiwaanhayaha Shirkaduhu.
- 2 Codsiga waxaa lagu soo lifaaqayaa sharciga aasaaska shirkadda isagoo qaab elektiroonig ah loo soo saaray ama qaab gaar ah u diyaarsan.
- 3 Marka uu Diiwaanhayaha Shirkaduhu helo codsi waxaa uu ka dalban karaa cadsadaha in uu bixiyo macluumaa kale ama faahfaahin dheeri ah oo macquul ah sida uu waajibinayo Xeer-nidaamiyahani.

### **Qodobka 9aad: Ganacsiyada Nidaamsan**

1. Shirkadaha ganacsiga ama adeeg bixinta ee, si waafaqsan sharciyada iyo qawaaniinta kale ee Dalka, uu ku waajibay ogolaansho ama fasax ay hay'ado kale ee dawladeed bixiyaan, marka ay qaataan shaahadada diiwaangelinta shirkadda iyo laysinka ganacsiga waa in aysan bilaabin hawlahooda ganaci, ka hor inta aan la siin ogolaanshaha iyo fasaxa laga rabo hawlaho ganaci ee sida gaarka u nidaamsan.

### **Qodobka 10aad: Shuruudaha Magaca**

- 1 Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuu diidi karaa in uu diiwaangaliyo shirkad leh magac kaas oo:
  - a) lamid ah magac ay shirkad kale horey uga diiwaangashan tahay, ama aad uugu eeg magac kale oo ay dhici karto in lagu khaldo, ayna suurto gal tahay in lagu marin hababiyo dadweynaha,
  - b) ah diin-cay ama anshax xumo ama aflagaado ku ah qof ama koox dad ah,
  - c) Tilmaamaya in ay taageerto ama ka mas'uul tahay Dawlada Soomaaliya ama waaxaha dawladha ama hay'adeheeda haddii aan ogolaansho laga haysanin.
  - d) ka kooban magaca qof jira haddii aanan qofkaasi sidaa qoraal ahaan ku ogolaan.
- 2 Diiwaanhayaha Shirkaduhu, ka dib marka uu siyo shirkad fursad lagu dhagaysto, wuxuu ku amri karaa shirkadda in ay ku beddesho magaceeda muddo uu cayimayo Diiwaanhayaha Shirkaduhu, taas oo aan ka yarayn 4 toddobaad laga bilaabo taariikhda amarka, waa haddii uu Diiwaanhayaha Shirkaduhu qabo in ay qummanayd in aan shirkaddaa lagu diiwaangelin magacaas sababaha ku xusan Qodobkan awgeed.
- 3 Qof kasta oo ay dhib ka soo gaadho amarka noocan oo kale ah wuxuu rafcaan u qaadan karaa maxkamadda, taasoo oo sida ay isleedahay way habboon tahay go'aan uga gaadhi karta amarkaas.
- 4 Magaca shirkad dadweyne ama shirkad gaar loo leeyahay oo ku dhisan Sharciga Shirkaduhu waa inuu ku dhammaadaa mid ka mid ah erayada soo socda ama soo gaabin ama ereyo kale ama soo gaabin la mid ah oo uu ansixiyay Diiwaanhayaha Shirkaduhu:
  - (a) "Limited" or "Ltd."

(b) "Incorporated" or "Inc."

#### **Qodobka 11aad: Sii Qabsasho Magac**

- 1 Qofka doonaya inuu adeegsado magac shirkadeed wuxuu sii qabsan karaa xaqquqda khaaska ah ee uu ku yeelan karo magaca isagoo codsi u gudbinaya Diiwaanhayaha Shirkadaha. Codsiga waa inuu sheegaa magaca iyo cinwaanka codsadaha iyo magaca uu dalbanayo in uu sii qabsado.
- 2 Haddii magacaasi aanuu horey u diiwaangashanayn uuna waafaqsan yahay Qeybta 1aad ee qodobkan, marka uu codsaduhu soo dalbado Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu usii qaban doonaa codsadaha isticmaalka khaaska ah ee magacaas muddo 90 maalmood ah, oo la cusbooneysiin karo illaa laba jeer oo dheeri ah oo min 30-maalmood ah.
- 3 Haddii magacaa la sii qabsanayaa uu yahay mid aan hore loo qaadan, diiwaangelintisu waxaa lagu samayn doonaa muddo 1 maalin oo shaqo gudaheed ka dib marka codsiga si sax ah loo xareeyo

#### **Qodobka 12aad: Beddelidda**

##### **Magaca**

- 1 Shirkadda dooneysa in ay beddesho magaceeda waxay u gudbineysaa isbeddelka Diiwaanhayaha Shirkadaha iyadoo la raacayo nidaamka Qodobka 10aad ee xeernidaamiyahani. Isla marka uu Diiwaanhayuhu helo codsi si sax ah loo buuxiyay Diiwaanka Shirkaduhu wuxuu ku qori doona magaca cusub ee shirkadda diiwaanka shirkadaha isla markaana wuxuu u soo saari doona shirkadda shahaado taas oo muujinaysa beddelka magaca.
- 2 Wixii isbeddel ah sida beddelka magaca, beddelka agaasimayaasha, saamileyda iyo saraakiisha, isbeddelka howlaha ganacsi, waxaa loo gudbin doonaa Diiwaanhayaha Shirkadaha.
- 3 Shahaadada beddelka magaca waxaa lagu soo saari doonaa magicii hore iyo kan cusubba.

#### **Qodobka 13aad: Caddeyntha Cinwaanka**

- 1 Waa in lagu tilmaamo foomka diiwaangelinta cinwaanka rasmiga ah ee shirkadda, cinwaanka xubnaha golaha maamulka, nuqlu baasaboor, telefon lambar, cinwaan email iyo caddeyn xisaabta bankiga (bank account statement) ee xubin kasta ee golaha maamulka.

#### **Qodobka 14aad: Khidmadda**

- 1 Khidmadda shahaadada aasaaska shirkaddu waa lacag hal mar la bixinayo oo u dhiganta \$100 oo la bixinayo hal mar waqtiga diiwaangelinta.
- 2 Iyadoo ay ku xirantahay baaxada iyo nooca ganacsiga khidmadda Laysinka ganacsigu waa ay kala duwan tahay waxayna ku taxantahay Shaxda 1aad.
- 3 Khidmadda soo saarista Laysinka ganacsiga iyo kharashka cusboonaysiinteeda sanadlaho ahi waxay ku qoranyihiin Jadwalka 1aad.
- 4 Wax lacag ah lagama qaadi doono xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, hay'adaha ama waaxaha dawladda marka ay xaraynayaan dukumintyo ama adeegyo kale uu u qabanayo Diiwaanhayaha Shirkaduhu.

- 5 Caddeynta bixinta khidmadda waa in la diyaariyo oo la siiyo macaamilka adeegga loo qabtay.
- 6 Wasaaradda Ganacsiga & Warshaduhu waxaa ay dib-u-eegis joogto ah ku sameyn doontaa dakhliga Diiwaanhayaha Shirkadaha iyadoo wax-ka-beddelka lama-huraanka ah ku samayn doonta Shaxda 1aad ee khidmadaha.

#### **Qodobka 15aad: Warbixin Sannadeedka Shirkadda**

- 1 Shirkad kastaa waa in ay u soo gudbisaa warbixin sannadeed Diiwaanhayaha Shirkadaha sida uu dhigayo qodobkani. Warbixintaas waa in lagu soo gudbiyaa muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka bilaabaneynsa maalinta sanad-guurada markiii la bixiyay shahaadada aasaaska shirkadda. Macluumaadka ku jira warbixin kasta oo sanadle ah waa in ay sax ahaadaan wakhtiga la rabo in la gudbiyo.
- 2 Warbixin sannadeedka waa in ay ku jiraan macluumaadka hoos ku taxan:
  - (a) Magaca shirkadda.
  - (b) Cinwaanka saldhigga maamulka iyo xarunta shirkadda ku ganacsato (haddii ay ka duwan tahay).
  - (c) Magacyada iyo cinwaanada golaha maamulka, agaasimaha guud ee fulinta, iyo magacyada iyo cinwaanada golaha fulinta.
  - (d) Nooca shirkaddu ay tahay iyo hawlaheeda ganacsi ee ugu muhiimsan.
  - (e) Macluumaadka saamileyda shirkadda, tirada guud ee saamiyadda shirkadda iyo sida loo kala leeyahay.
  - (f) Isbedellada golaha maamulka, golaha fulinta iyo saamileyda, tirada guud ee saamiyada iyo qiimaha saamiyada shirkadda.
  - (g) Xaqiijin in shirkaddu ku shaqaysay hawlahe ganacsiga ee laysinka ku tilmaaman.
- 3 Xafiiska Diiwaanhayaha Shirkadaha ayaa bixin doona foomam loo adeegsado soo gudbinta warbixin-sannadeedka wuxuuna dalban karaa in foomamkaas la isticmaalo.
- 4 Haddii shirkaddu ku guuldareysato in ay soo gudbiso warbixin sannadeedka sida ku xusan Qodobkan, shirkaddu waxay muteysan doontaa ganaax sida ku qeexan Shaxda 1aad.

#### **Qodobka 16aad: Noocyada Lacag Bixinta**

- 1 Noocyada lacag bixinta ah ee la aqbalay waxaa ka mid ah lacag caddaan ah, jeeg, iyo wareejin toos ah oo bangi ah, lacagta moobaylka iyo lacag bixinta khadka tooska ah (online payment).

#### **Qodobka 17aad: Diiwaanada Elektarooniga ah iyo Kuwa Aan ahayn iyo Faylasha**

- 1 Diiwaanhayaha Shirkadaha ayaa suurto galin doona in qaab elektaroonik loo gudbin karo dhammaan dukumiintiyada shirkadda sidoo kalena dukumiintiyadaas ka dhigi doona kuwo si toos ah loogu heli karo elektaroonig ahaan.
- 2 Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu u hayn karaa diiwaanadiisa, oo ay ku jiraan dukumiintiyada ay shirkaduhu u soo gudbiyaan Diiwaanhayaha Shirkadaha, qaab kasta oo elektaroonik ah ama qaab kasta oo kale oo wax loo keydiyo, mar haddii

diiwaanadaas waqt macquul ah gudeheed loogu beddeli karo warqad si cad loo akhrin karo.

- 3 Waxay Shirkadi u haysan kartaa diiwaanadeeda, oo ay kujiraan diiwaanada xisaabaadka, diiwaanada dulsarka ama lahaanshaha saamiyada, iyo hadal-qoraalka shirarka, qaab kasta oo elektaroonik ah ama qaab kasta oo kale oo wax loo keydiyo, mar haddii diiwaanadaas waqt macquul ah gudeheed loogu beddeli karo warqad si cad loo akhrin karo.
- 4 Xafiiska Diiwaanhayaha Shirkaduhu ama shirkadiba (marba ka loo jeedo) ayaa u beddeli doona diiwaanadaas oo dhan qaab warqad oo si cad loo akhrin karo marka laga codsado cidda awood u leh in ay aragto diiwaanadaas iyada oo la raacayo qodob kasta oo ka mid ah sharcigan.

#### **Qodobka 18aad: Sixidda Xogta Diiwaangashan**

Waxaa ay Shirkada ka dalban kartaa Diiwaanhayaha Shirkadaha sixitaanka xog la galiyay diiwaanka haddii:

- a) ay ka kooban tahay wax kasta oo sharciga khilaafsan
- b) ay ka kooban tahay arrin kaas oo, nuxur ahaan, qaabka loo dhigay ama meesha la dhigay awgeed noonday been ama marin habaabin;
- c) Iyadoo sababtu tahay wax laga tagay ama si qaldan loo sharraxay aan loo dhammaystirin ama khalad ah ama aan sax ahayn.
- d) Sixitaanka waxyabaha fudud waxaa loo gudbinayaa Diiwaanhayaha Shirkadaha si loo cusbooneysiyo diiwaanada shirkadaha.
- e) Diiwaanhayaha Shirkaduhu wuxuu diidi karaa codsi kasta oo noocaas ah, go'aanka noocaas ahna ee Diiwaanhayaha Shirkaduhu gaadhana waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda.

#### **Qodobka 19aad: Diiwaangelinta Laan Shirkad Shisheeye**

1. Codsiga diiwaangelinta Shirkad Shisheeye waa in lagu soo lifaaqo:

- a) Wakaalad (Power of Attorney) diiwaangelin shirkad shisheeye oo nootaayeysan lagana soo tastiqay Safaaradda Soomaaliya ee dalka shirkadda shisheeye ka diiwaangashan tahay.
- b) Nuql Nidaamka Asaasiga (Article of Association) iyo Heshiiska Dhismaha (Memorandum of Association) ee shirkadda, oo notaayeysan lagana tastiqay Safaaradda Soomaaliya ee dalka shirkadda shisheeye ka diiwaangashan tahay.
- c) Shahaadada diiwaangelinta shirkadda shisheeye ee uu bixiyey diiwaanhaya dalka shirkadda shisheeye ka diiwaangashan tahay, oo notaayeysan lagana tastiqay Safaaradda Soomaaliya ee dalka shirkadda shisheeye ka diiwaangashan tahay.
- d) Nuql go'aanka golaha saamileyda ee shirkadda oo lagu fasaxayo furitaanka laanta shirkadda ee Soomaaliya, waana in go'aankaasi notaayeysan yahay lagana tastiqay Safaaradda Soomaaliya ee dalka shirkadda shisheeye ka diiwaangashan tahay.

*K. Omar*

- e) Nuql Baasaboorrada saamileyda ama maamulayaalka shirkadda shisheeye.
  - f) Agaasimaha ama agaasimeyaasha shirkadda shisheeye ee Soomaaliya deggan.
  - g) Magaca Wakiilka sharciga ah (Legal Representative) ee shirkadda shisheeye.
2. Diiwaanhayaha marka uu ku qanco in codsiga diiwaangelinta shirkadda shisheeye dhammeystiran yahay, wuxuu siinayaa shirkadda shisheeye Shahaadada Diiwaangelinta Shirkad Shisheeye (Certificate of Registration of Foreign Company).
3. Qodobkaani waxba uma dhimaayo shuruudaha iyo habraaca Sharciga Maalgashiga Shisheeye lr.13 ee 21/01/2016.

#### **Qodobka 20aad: Xasaanadda**

Waxba loo raaci maayo Diiwaanhayaha Shirkadaha iyo dhammaan hawladeenadiisa wax ay sameeyeen ama wax ay ahayd in ay sameeyaan Diiwaanhayaha Shirkadaha iyo dhammaan hawladeenadiisu oo ay ka tageen marka darteed iyagoo u gudanaya, si niyad wanaag ah, waajibaadkooda uu dhigayo xeer-nidaamiyahani.

#### **Qodobka 21aad: Xadgudubyada iyo Ganaaxyada**

1. Qof kasta oo jabiya xeer-nidaamiyahani ama xeerar kasta oo ay soo saarto Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha oo hoos imanaya Sharciga Shirkadaha 2019 wuxuu geysanayaa xadgudub, wuxuu mutaysanayaa ganaaxa ku tilmaaman Shaxda 1aad.
2. Haddii uu khilaaf ku yimaaddo xeer-nidaamiyahani waxaa arrintaa go'aan ka gaadhaya Wasiirka, haddii uu khilaafku dhammaan waayana, waxaa arrintaa racfaan loo qaadan karaa maxkamadda.

#### **Qodobka 22aad: Xeer-Nidaamiyeeyasha**

1. Si waafaqsan Qodobka 97aad ee Sharciga Shirkadaha 2019 Wasiirku wuxuu soosaari doonaa wixii xeer-nidaamiyeeyaal ah oo meelmarinta sharcigaasi uu hadba u baahdo.
2. Sharciga Shirkadaha Lr.18 ee 26 Disember 2019 iyo Xeernidaamiyahaan ayuu ka kooban yahay Xeerkha Shirkadaha Soomaaliya waxaana markasta hortabin leh Sharciga Shirkadaha.

#### **Qodobka 23aad: Dhaqangalinta**

1. Xeer-nidaamiyehani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha laguna soosaaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Xil. Khaliif Cabdi Cumar  
Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha  
Muqdisho, 27 Diseembar, 2020



**Shaxda 1aad**  
**Khidmadda Aasaasidda Shirkadaha**

ADEEG	Lacagta	Wakhtiga
Soo saaridda shahaadada aasaasidda shirkadaha	Lacag u dhiganta \$100	1 maalin
Soo saaridda nuqul koobi ah oo shahaadada aasaasidda shirkadaha	Lacag u dhiganta \$ 25	1 maalin
Soo gudbinta magac beddelid	Lacag u dhiganta \$ 100	1 maalin
Dib u diiwaangelin, tusaale marka shirkado isku biiraan ama isbeddel weyn dhaco	Lacag u dhiganta \$ 100	1 maalin
Soo gudbinta Warbixinta Sannadlaha ah	Bilaa Khidmad/Bilaash	
Soo gudbinta in si ikhtiyaar ah looga saaro magac diiwaanka	Bilaa Khidmad/Bilaash	
In qaab elektaroonig ah loo baadho diiwaanada	Bilaa Khidmad/Bilaash	1 maalin
Ka diiwaangelinta shirkad shisheeye ah dalka Soomaaliya	Lacag u dhiganta \$ 100	Ugu badnaan shan (5) todobaad
Beddelida magaca shirkadda ama magac kale oo ay leedahay shirkad shisheeye	Lacag u dhiganta \$ 100	Ugu badnaan afar (4) todobaad.
Baaris magac shirkadeed ama ganacsi	Khidmad la'aan	Waxa ay ku xidhantahay nooca adeegga

*K. Omar*

Dhigasho magac shirkadeed	Khidmad \$20	Waxa ay ku xidhantahay nooca adeegga
Nuqlu macluumaadka shirkad diiwaangashan	Khidmad \$20	Waxa ay ku xidhantahay nooca adeegga

### Shaxda 2aad

#### Ganaaxyada

Dib u dhac Warbixin Sannadeedka	Ganaaxa
Dib u dhac 4 bilood ah	10% (boqolkiiba toban) qiimaha laysinka ganacsiga ee shirkaddu haysato.
In ka badan 1 sanno	Digniin in 60 maalin gudahood lagu soo gudbiyo warbixin sannadeedka. Marka ay dhammaato muddada 60 maalin, waxaa shirkadda laga tirtirayaan diiwaanka shirkadaha.

K. Omar

### **Shaxda 3aad**

#### **Sumadda Abla-ablaynta Hawlaha Ganacsiga (ICC)**

Summadda Abla-ablaynta Hawlaha Ganacsiga (Industrial Classification Code) waxaa kala tilmaamayaan noocyada kala duwan ee hawlaha ganacsiga iyo wax soosaarka. Hal ganacsi ayaa wuxuu yeelan karaa mid ama in ka badan oo summadaha ICC ah.

#### **A. BEERAHA, DHIRTA IYO KALLUUMAYSIGA**

<b>ICC</b>	<b>WAAXDA</b>	<b>Kharashka (USD)</b>
A1	WAX SOO SAARKA BEERAHA -- DALAGA	\$300
A2	WAX SOO SAARKA BEERAHA - XOOLAH	\$300
A3	ADEEGYADA BEERAHA	\$300
A4	DHIRTA	\$300
A5	UGAADHSIGA	\$300
A6	KALLUUMAYSIGA	\$300
A7	ADEEGYADA KALLUUMAYSIGA	\$300
A8	WAX SOO SAARKA BEERAHA – DIGAAGGA	\$300

#### **B. MACDANTA**

<b>ICC</b>	<b>WAAXDA</b>	<b>KHARASHKA (USD)</b>
B1	QODISTA BIRAH	\$1,000
B2	QODISTA MACDANTA	\$3000
B3	SOO SAARIDDA SALIIDDA IYO GAASKA	\$3000
B4	MACDANTA AAN BIRTA AHAYN OO AANAY KU JIRIN SHIDAALKU	\$500

#### **C. DHISMAHA**

<b>ICC</b>	<b>WAAXDA</b>	<b>COST (USD)</b>
C1	QANDARAASLAYAASHA DHISMAHA GUUD (ADEEGGA)	\$300
C2	QANDARAASLAYAASHA DHISMAYAASHA WAAWEYN	\$500
C3	QANDARAASLAYAASHA GAARKA AH (SOO DHOOFINTA QALABKA DHISMAHA)	\$300

#### D. WAX SOO SAARKA

Tani waxaa ay ku xidhnaan doontaa dakhliga sannadlaha ah iyo tirade shaqaalaha sida ay tilmaamayaan qeexitaanada siyaasadda ganacsiga yar-yar iyo kuwa dhexe (SME)

	<u>Tirada Shaqaalaha</u>	<u>Hantida Guud</u>
<u>Aad u yar (Micro)</u>	<u>1 -5</u>	<u>\$1,000 - \$10,000</u>
<u>Yar-yar (Small)</u>	<u>6 – 50</u>	<u>\$10,001 - \$50,000</u>
<u>Dhexdhexaad (Medium)</u>	<u>51-100</u>	<u>\$50,001 - \$100,000</u>
<u>Weyn (Large)</u>	<u>101 iyo ka badan</u>	<u>100,001 and more</u>

ICC	Qeybta	KHARASHKA (USD)			
		Aad u Yar	Yaryar	Dhexdhexaad	Waaweyn
D1	CUNTOOYINKA IYO WIXII LA XIRIIRA	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D2	SOO SAARAYAASHA BUURIGA	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D3	ALaabta Mashiinka Dharka	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D4	Alaabta Dharka	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D5	Alaabta Geedaha Iyo Alwaaxda	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D6	Alaabta Guryaha Iyo Qurxinta	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D7	Warraaqaha Iyo Alaabaha La Xidhiidha	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D8	Daabacaadda Iyo Baahintaa	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D9	Kimikooyinka Iyo Alaabaha La Xidhiidha	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D10	Alaabaha Shidaalka Iyo Dhuxul-Dhagaxda	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D11	Caagga Iyo Alaabaha Balastiga Kala Duwan	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D12	Saanta Iyo Alaabaha Saanta	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D13	Alaabaha Dhagaxa, Dhoobada Iyo Quraaradda	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D14	Warshadaha Birta	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D15	Mashiinada, oo aanay ku jirin	\$300	\$500	\$700	\$1,000

*K. Omar*

	KUWA KORONTADA				
D16	QALABKA KORONTADA IYO KUWA ELEKTAROONIGA	\$300	\$500	\$700	\$1,000
D17	QALABKA GAADIIDKA	\$300	\$500	\$700	\$1,000

**E. GAADIIDKA IYO BAAHIYAHADADWEYNNAHA**

ICC	WAAXDA	KHARASHKA (USD)
E1	GAADIIDKA TAREENADA	\$500
E2	GAADIIDKA GUDAHIA IYO MAGAALOOYINKA DHEXDOODA	\$300
E3	GAADIIDKA XAMMUULKA IYO BAKHAARADA	\$500
E4	ADEEGGA BOOSTADA	\$300
E5	GAADIIDKA BIYAHAD	\$300
E6	GAADIIDKA HAWADA	\$1,000
E7	QASABADAH, LAGA REEBO KUWA GAASKA DABIICIGA	\$300
E8	ADEEGYADA GAADIIDKA	\$300
E9	IS-GAADHSIINTA	\$3,000

**F. GANACSIGA JUMLADDA AH**

ICC	WAAXDA	COST (USD)
F1A	GANACSIGA JUMLADDA - ALaabta waarta	\$300
F2A	GANACSIGA JUMLADDA - ALaabta aan waarayn	\$500

**G. GANACSIGA TAFAARIIQDA**

ICC	WAAXDA	KHARASHKA (USD)
F1	QALABKA DHISMAHA IYO AGABKA BEERAHA	\$300
F2	DUKAANADA ALaabta GUUD	\$300
F3	DUKAANADA CUNTADA	\$300
F4	DUKAANADA ALaabta GAWAADHIDA & XARUMAHA ADEEGYADA	\$300
F5	DUKAANADA DHARKA IYO AGABKA WEHELIYA	\$500
F6	DUKAANADA QALABKA GURYAHIA IYO ALaabta LAGU QURXIYO GURYAHIA	\$500
F7	GOOBABA CUNTADA IYO CABITAANKA	\$300
F8	TAFAARIIQ ALaabaha ISKU-JIRKA AH	\$300

*K. Omar*

**H. MAALIYADDA CAYMISKA IYO HANTIDA MA GUURTADA AH**

ICC	WAAXDA	KHARASHKA (USD)
G1	BANGIYADA	\$3,000
G2	XARUMAHA DEYN-BIXINTA, OO AANAY KU JIRIN BANGIYADU	\$500
G3	DILLAALIINTA ALAABAHA IYO SECURITYGA IYO ADEEGBIXIYEYAASHA	\$1,000
G4	SHIRKADAH A CAYMISKA	\$1,000
G5	WAKIILADA CAYMISKA, DILLAALINTA IYO ADEEG- BIXIYEYAASHA	\$500
G6	HANTIDA MA GUURTADA AH	\$300
G7	XAWAALADAHA	\$1000

**I. ADEEGYADA**

ICC	WAAXDA	COST (USD)
H1	HUDHEELADA IYO GOOBAHA KALE EE LA DAGO	\$500
H2	ADEEGYADA XIRFADDA	\$300
H3	ADEEGYADA GANACSIGA (TALO-BIXINTA)	\$300
H4	DAYACTIRKA GAWAADHIDA, ADEEGOODA IYO GEERASHYADA	\$300
H5	ADEEGYO KALA DUWAN OO DAYACTIR AH	\$300
H6	ADEEGYADA MAAWEELADA IYO MADODAALADA	\$300
H7	ADEEGYADA CAAFIMAADKA	
	CUSBITAALADA	\$800
	XARUN CAAFIMAAD	300
H8	ADEEGYADA SHARCIGA	\$300
H9	ADEEGYADA WAXBARASHADA	
	DALADAH A WAXBARASHADA	\$500
	JAAMACAD	\$1,000
	DUGSIYADA SARE	\$300
	MAC-HAD	\$300
H10	ADEEGYADA BULSHO	\$300
H11	MAXDAFYADA IYO BEERAHA DHIRTA IYO XAYAWAANKA	\$300
H12	URURADA XUBINIMADA	\$300
H13	ADEEGGA MAAMULKA	\$300
H14	DAABULK A IYO SAADKA	\$500
H15	ADEEGYADA INTERNETKA IYO ICT	\$300

H16	ADEEGYO ISKU-DHAFAN <u>K - HAWLAHA IYO ADEEGYADA KALE</u>	\$300
ICC	<b>WAAXDA</b>	<b>KHARASHKA (USD)</b>
K1	HAWLAHA IYO ADEEGYADA KALE	\$500

*K. Omar*

